# Guadalupe Guerrero



Guadalupe Guerrero wuxuu la imaanayaa aasaas aqooneed oo qoto dheer iyo xirfad dejisan oo ah hoggaamiye waxbarasho, isaga oo ah qof si weyn uga fikira nidaamyada, isla markaana ah istaraatiijiyad dejiye.   Hoggaamintiisa waxbarasho ee ballaaran waxaa sii wanaajisay shaqo uu ka soo qabtay nidaamyada laba dugsi oo weyn oo magaalada ka yaala, isaga oo u soo shaqeeyay hogaamiyaha dugsiga sare, maamulaha dugsiga, iyo macallinka fasalka ahaan. Wuxuu sidoo kale dhammeystay barnaamijada hoggaaminta sare oo ka caawiyay in uu kordhiyo fikirkiisa ku saabsan waxbarashada dadweynaha.

Iyadoo ay sabab u tahay waxbarashadiisa rasmiga ah iyo waayo-aragnimadaada shakhsi, Guadalupe wuxuu dejiyay aasaaska aaminsanaan muhiim ah oo ku saabsan doorka waxbarashada dadweynaha. In dhammaan ardayda oo idil ay tahay in ay helaan fursado ballaaran oo loo wada siman yahay oo la xiriira dugsiga.   In aanu leenahay masuuliyada wadajirka ah si loo xaqiijiyo in dugsiyadeenu ay yihiin kuwo wax daryeela, meelo wax taageera halkaasi oo ilmo kastaa gaaro guul tacliimeed.  In bulshadeena dugsigu ay taageerto caafimaadka, horumarinta dareenka bulsho ahaaneed ee ardayda iyo in aan ka caawino carruurta iyo dhallinyarada in ay ogaadaan isla markaana kordhiyaan hibada iyo xirfada gaarka ah ee ay leeyihiin. Wuxuu aaminsan tahay in ay tani suurtagal tahay, marka dhammaan heerarka kala duwan ee degmadu ka kooban tahay u wada shaqeeyaan habab isku mid ah oo isku xiran, gaar ahaan marka dugsiyadeenu iskaashi dhow la yeeshaan qoysaska iyo bulshada. Shaqadeena waa in ay noqotaa mid mar walba la isku dayo in ay wanaagsanaato, shaqada adag ee dugsiyada iyo nidaamka dugsigu waa in uu diiradda saartaa horumarinta joogtada ah, iyo in dhammaan ay tahay in la qaado dadaalo ardaydu xudunta u tahay isla markaana diirada lagu saarayo sinnaanta marka go’aan la gaarayo.

## Koritaankiisii

Guerrero wuxuu ogaaday awoodda waxbarashada waqti hore oo ay da’diisu yarayd.  Marka ay noqoto qoyskiisa, dugsiga waxaa loo aqoonsanaa in uu yahay albaabka muhiimka ah ee lagu gaarayo fursadaha kale.  Isaga oo ah ka ugu da’da weyn afarta qof ee walaalaha yihiin, wuxuu arkay isla markaana ku dadaalay in uu kaga daydo anshaxa shaqo iyo qiimaha muhiimka ah ee ay leedahay hooyadiisa keliya ee aadka u shaqaynaysa.  Guadalupe iyo labadiisa wiil ee ay walaalaha yihiin waxay kasbadeen darajo ay ka gaaraan Eagle Scout iyaga oo mid kastaa bilaabay tababarka muusikada ay maalin kasta cayaaraan ee ay hibada u leeyihiin ee gitaarka, piano, iyo fayaliinta ‘violin’.

Sida dad kale oo badan, Guadalupe wuxuu ka shaqeeyay oo gaaray ilaa kulliyad isaga oo isku miisaamay shaqooyin kala duwan -- oo ay ka mid ahaayeen isaga oo ka soo shaqeeyay maqaayado iyo bangiyo, shaqaale nadiifiye ah habeenkii, sidoo kalena ka soo muuqday cajaladaha fiidiyaha ee muusikada xirfadda leh iyo bandhigida aroosyada. Fikradaha ku saabsan adeega bulshada iyo hoggaaminta shaqaale ayuu sidoo kale bilaabay waqti hore oo ay da'diisu yarayd. Markii uu ku jiray dugsiga sare, Guadalupe wuxuu ahaa mid firfircoon marka ay noqoto maamulka arday, isaga oo noqday madaxweynaha heerka fasalka saddexaad iyo madaxweynaha guddiga ardayda dugsiga sare ee weyn oo uu noqday sanadkiisii u dambeeyay ee dugsiga. Guadalupe wuxuu sidoo kale ka qayb qaatay kooxda lagdinta iyo kubadda cagta 'football, wuxuuna bilaabay xiiso uu u qabo suugaanta iyo taariikhda labadoodaba.

Sida ilmo yar, Guadalupe wuxuu galay dugsiyada dadweynaha ee ku yaala Degaanka San Francisco Bay isaga oo ah Bartaha Luqadda Ingiriiska. Markii ay qoyskiisu u guureen Central Valley, dugsigu ma bixin taageero la mid tii hore oo la xiriirta horumarinta luqadda, isaga oo u baahday ay in uu dadaal dheeraad ah saaro isla markaana wax iska barto isaga oo arday kaliya ah. Markii uu ku jiray dugsiga hoose, macallin muusikada dhiga ayaa xiiseeyay Guadalupe isla markaana ku martiqaaday in uu ku soo biiro fasalada qalabka muusikada. Iyada oo ay la xiriirto dhiirigelinta macallinka, Guadalupe wuxuu sii waday waxbarashada rasmiga ah ee fayaliinta 'violin' caadiga ah. Ugu dambeyn anshaxiisii iyo shaqadisii adkayd ayaa la aqoonsaday isaga oo noqday qof kaligiis wax soo bandhiga iyo doorar hoggaamineed oo uu ka qabtay kooxda muusikada dugsiga taasi oo keentay in uu ku guuleysto tijaabadiisii Dugsiga Farshaxanka ee UCLA isaga oo ku takhasusay waxbarashada muusikada.

Intii uu ku jiray kulliyadda, Guadalupe wuxuu fursad u helay in uu la shaqeeyo dhalinyarada gudaha magaalada, isaga oo aamminsanaa in farshaxanku noqdo qayb muhiim ah oo ka mid ah waayo-aragnimada arday kasta, wuxuu sidoo kale dareemay in arday badani ay tacliin ahaan dhibaato haysatay. Waxaa hada iyo jeer soo jiidan jiray la shaqaynta carruurta iyo dhallinyarada – isaga waqtiyadiisa xagaaga ee dugsiga sare u shaqaynayay la taliyaha xerada 'camp' ahaan -- sidaa darteed intii uu bartamaha kaga jiray waxbarashadiisii jaamacadeed, waxaa caddeyd in uu doonayo in uu ka shaqeeyo waxbarashada dadweynaha. Inkasta oo uu xiiseeyay muusikada, hamigiisii ma noqon in uu noqdo muusik yaqaan xirfad leh, sidaa darteed wuxuu go'aansaday in uu takhasuskiisa u bedelo taariikhda.

## Shaqadii koowaad: Wuxuu noqday kalkaaliye macallin ka dibna macallin

Maalintiisu ugu dambeysay ee UCLA, wuxuu isaga oo gaari wata dib ugu laabtay San Francisco wuxuuna u tagay urrur bulshada ku salaysan oo ka jira Degmada Mission iyada oo isla markiiba la shaqaaleysiiyay si uu ardayda ku nool xaafadaha ay badan yihiin muhaajiriita ka soo jeeda Latino u siiyo wax barid tacliimeed iyo si uu taageero uga geyso dadaalada ka qayb qaadashada waalidka. Waxa uu u shaqeeyay kalkaaliyaha macallinka ee fasalka ahaan ama caawiye ahaan wuxuuna codsaday in uu ku biiro barnaamijka waxbarashada macallinka ee gu'gaasi socday. Intii uu ka helayay shahaadadiisa waxbarid, wuxuu subaxdii wax u soo dhigay ardayda fasalka koowaad ee dugsiga Oakland, halka uu galabtii xisaabta iyo sayniska u dhigayay ardayda dugsiga dhexe. Markii uu helay shahaadadiisa waxbaridda Laba Luqaddood ee Isbaanishka, Guerrero ka dib wuxuu saddex sano wax u soo dhigay dugsiyada dadweynaha ka hor intaanu u guurin Boston si uu wax u baro afar sano oo kale. Wuxuu sii waday in uu wax baro heerarka fasalada kala duwan, isaga oo noqday qof ku takhasusay akhriska/qoraalka, iyo bixinta hoggaanka macallinimo.

Guadalupe wuxuu codsadey oo loo oggolaaday Barnaamijka Hoggaaminta Dugsiga ee Waxbarashada Dugsiga ee Qalin-jabiyaha Harvard; waxaa si xiriir ah loogu magacaabay aqoonsiga James B. Conant Fellow, taasi oo u aqoonsatay in uu yahay “macallin leh karti wax ku ool ah.” Markii uu dhammeystay shahaadadan maamulka ee Harvard, Guadalupe wuxuu helay dalabyo shaqo oo badan si uu noqdo maamulaha cusub ee dugsiyo kala duwan oo ku yaala degaanka Boston.

## Isaga oo qaadanaya shaqada adag ee booskiisa koowaad ee maamulaha dugsiga

Kormeeraha guud ee sida fiican loo tixgeliyo ee Boston, Dr. Thomas Payzant, ayaa ka codsaday Guadalupe in uu qabto shaqada mid ka mid ah dugsiyada dhibaatada ugu badani haysato ee ka tirsan Dugsiyada Dadweynaha Boston, Dugsiga Hoose ee Paul A. Dever. Isaga oo had iyo jeer diyaar u ah in uu aqbalo loolanka ugu weyn, Guadalupe wuxuu aqbalay maamulka kormeeraha guud, si uu xirfaddiisa ugu isticmaalo taageerada iyo in uu isbedel weyn ku sameeyo dugsi uu waxqabadkiisu hooseeyay oo ku dhex yaala bulsho aan si fiican adeega u helin kaasi oo u adeegaya tiro badan oo ka mid ah bartayaasha luqadda labaad iyo ardayda naafada ah.

Markii uu soo gelay shaqada, way caddeyd in uu baahan doono in si aad u ah loo kordhiyo xaaladaha iyo taageerada dugsiga, iyada oo si xiriir ah loo bilaabay in macallimiinta laga caawiyo xoojinta barnaamijka tacliimeed. Guadalupe iyo kooxdiisu waxay ka faa’iidaysteen hay’adaha xaafadda ee deegaanka iyo xarumaha caafimaadka in si wadajir la isku keeno taageerada buuxda ee loo baahan yahay ee loogu talagalay arday badan oo qabta dhibaatooyin naxdinta leh iyo saboolnimada. Arday badani waxay ahaayeen kuwo cusub oo baranaya Ingiriisiga, oo inta badan leh dugsi hore oo kooban. Intaasi waxaa dheer, in dugsigu martigeliyey mid ka mid ah barnaamijyada ugu ballaaran ee magaalada kaasi oo loogu talagalay ardayda la aqoonsaday in ay qabaan dhibaato dhanka niyada ah iyo naafanimo kale oo daran.

Kooxda dugsigu waxay bilaabeen shaqada adag ee lagu wanaajinayo natiijooyinka waxbarashada ardayga. Shaqo badan ayaa lagu bixiyay horumarinta xirfadda waxbarasho ee bulshada ee ka mid ka mid yihiin macallimiintu, wada shaqeynta joogtada ah iyo si wadajir ah u qorsheynta casharada, fiirinta iyo falanqaynta shaqada iyo xogta, iyo furitaanka albaabadooda fasalka iyaga oo u furaya asxaabtooda iyo tababarayaasha tacliimeed. Dadaal badan ka dib, dugsigu wuxuu muujiyay dareen adag oo ah qaababka, habab waxbarasho oo joogto ah, ka qayb qaadashada qoyska oo la kordhiyay, iyo arday aad u faraxsan ee diiradda saaraya waxbarashada. Ardayda naafada ah, oo mar hore sharaftooda hoos loogu dhigay fasallo ka baxsan albaabka danbe, ayaa la soo dhexgeliyay fasallada waxbarashada guud sida ugu macquulsan. Baaritaan ay sameysay waaxda waxbarashada ee gobolku waxay ku sheegtay in xaaladuhu si aad ah uga soo reeyeen iyo in dugsiga iyo hoggaamiyeyaashiisu ay ku hawlan yihiin nooca shaqo ee saxda ah. Xaqiiqdii, degmadu waxay fiiro gaar ah u yeelatay waxqabadka dhiirigelinta leh ee dugsiga.

Dugsigu wuxuu bilaabay in uu soo bandhigo qaar ka mid ah guulo hore oo dhiirigelin leh, ka dibna waxaa la soo gudboonaanayay dib u dhac iyo waxayna dhibaato ka soo gaaraysay in sii wadaan dardarta. Arrimaha la xiriira xasilloonida macallinka, baahi badan oo loo qabo horumarinta xirfadeed iyo qorsheynta waqtiga, socodka joogtada ah ee ardayda u muuqata in ay qabaan baahi weyn, jiritaan la’aanta ilo ku filan iyo taageero laga helo dugsiga degmada ayaa ugu dambeyntii xaaladda ka dhigtay halgan aad u adag. Guadalupe wuxuu ogaaday haddii aysan jiran xafiiska dhexe oo door firfircoon ka cayaaraya yareynta arrimaha ka baxsan awooda dugsiga, in uu dugsiga oo keliya, ka sakow dadaalada geesinimada leh, uu sii wadi doono in ay ku adkaato in uu guuleysto.

Isaga oo xiiseynaya ogaanshaha su'aashan ee ah sida nidaamyada dugsigu laga yaabo in ay u taageeraan wanaajinta dugsiga ee heerka qiyaasta la rabo, Guadalupe wuxuu codsadey oo loo oggolaaday in socodkii labaad ku aado Harvard, markan isaga oo qaadanaya Barnaamijka Kormeeraha Guud ee Magaalada ee aadka u wanaagsan, kaasi oo lix qof oo keliya sanad walba ka soo xusha waddanka.

Marka lagu soo laabto Dugsiga Hoose ee Dever, dhowr ka mid ah maamulayaal isku xigxiga ayaa dhibaato kala kulmay dhaqaajinta dhibcaha imtixaanka ee hal meel istaagay ilaa ugu dambeyntii, Gobolka Massachusetts oo go'aansaday in uu la wareego dugsiga.

Casharku wuxuu Guadalupe u ahaa mid cad: "Si aad ah waxba uguma bedeli kartid xaaladaha bulshada dugsiga ee ay dhibaato haysato iyada oo aanu jirin nidaam ballaaran oo wax lagu qabanayo oo adag. Nidaamka dugsigu wuxuu leeyahay mas'uuliyada uu ku xaqiijinayo taageerada dugsiga ee muhiimka ah iyo xaaladaha jira si ay u dhacdo in wax la barto. Ma aaminsani dib u habeynta dugsiyada ee yar, balse waxaan aaminsanahay in la bedelo nidaamyada oo dhan si looga dhigo mid wanaagsan isla markaana la kala saaro taageerada loo siman yahay ee dhammaan dugsiyada iyo ardayda."

## Wax ka bedelida nidaamyada si ay u wanaajiyaan dhammaan taageerada dugsiyada iyo ardayda

Markii uu ka tagay ardaydiisa Degmada Mission ee San Francisco si uu ugu guuro Boston, wuxuu u sheegay in uu u baahan yahay in uu sii wato waxbarashada, sidoo kale – laakiin in uu soo laaban doono. Markii tababarkiisii u dambeeyay ee shahaadiisa u sareysa ee 'doctoral' ay dib ugu soo celisay San Francisco, wuxuu fuliyay ballanqaadkaasi. Intii uu shaqada tababarka u qaadanayay, wuxuu gacan ka geystay abuurida qorshayaal tallaabo oo wax lagaga bedelayay dugsiga cusub, iyada oo loo magacaabay barnaamijka 'Superintendent's Zone', isaga oo wax ka qoray isla markaana la siiyay $45 malyuun oo ah deeqadaha federaalka ee wanaajinta dugsiga.

Markii uu barnaamijka Superintendent's Zone ka bilaabay Degmada Mission, koox ka mid ah dugsiyada PreK-12 ayaa lagu calaamadeeyay in ay yihiin "kuwo si joogta ah waxqabadkoodu u yar yahay" wixii ugu horreeyay ee uu sameeyay waxay ahayd in uu ka baxo xafiiska dhexe. Si ugu caawiyo dugsiyada in ay qaadaan qorshayaal geesinimo leh, wuxuu doonayay in uu ku dhawaado ficilka la samaynayo.

"Ma aanan dooneynin in aan noqdo mas'uul kale oo iska fadhiya xafiiska dhexe oo farriin qoraal ah u diraaya dugsiga, una sheegaya waxay tahay in ay sameeyaan," ayuu sheegy. Tallaabooyinkii ugu horeeyay ee uu qaaday waxay ahayd samaynta xero 'camp' "si hab wanaagsan la iskugu xiro shaqo maalmeedkooda."

Isaga iyo kooxdiisii ayaa labadii sano ee taasi xigay ku bixiyay in ay si dhow ula shaqeeyaan kooxahan dugsiyo, oo inta badan isku jira masaafad loo kala socon karo. Markii uu ku soo laabto xafiiska dhexe, wuxuu maamuli jiray qolka shirarka isla markaana isku bedeli jiray dhammaan madaxda waaxyaha si ay u sharaxaad uga bixiyaan sida ay u caawin karaan dugsiyadaasi – iyaga oo abaabulaya taageero dhexe oo muhiim ah.

Shaqadu waxay keentay natiijooyin dhiirigelin leh, iyado oo dugsiyadu ay aad iskugu xirmaan taasi oo ku saabsan wax baridda iyo waxbarashada. Tilmaanta la raacayay waxay ahayd mid aad u adag. Xaaladuhu way uga soo raynayeen ardayda. Dhibcaha imtixaanku kora ayay u kaceen – dugsi kastaa sidaasi ma ahayn – iyaga oo uu si aad ah oo wanaagsan uu kor ugu kacay marka la eego dhibaatooyinkii hore ee ay qabeen.

"Ta u muhiimsan, bulshada shaqaysa ee deriska ah waxay bilaabayeen in ay dareemaan raja jirta," ayuu sheegay.  Marka uu booqdo dukaanka tima jaraha marka uu sida joogtada ah timaha iskaga jarayo, qof kastaa wuxuu ugu yeeraa  "Maestro" iyaga oo la wadaaga sida wanaagsan ee ay ka dareemayaan qoridda carruurtooda ee dugsiyada xaafadda, oo ah meelo aanay caadiyan waqtiyadii hore tixgelinta siin jirin.  "Taasi waa amaanta ugu weyn.  Weli waxaa jirta shaqo u baahan in la qabto, laakiin waxaanu soo bandhignay waxa suurtagal ah, waxaanan qaadanaynaa waxqabadkan dhiirigelinta leh si aanu qiyaasno dhammaan dugsiyada magaalada."

## Qaadashada istaraatiijiyado lagu cabiro, degmada oo dhan

Laba sano ka dib markii uu Guerrero qaatay dugsiyada Goobta 'Zone schools', Ku-xigeenka Kormeeraha Guud ee degmada ee Waxbarashada, Wax curinta & Cadaaladda Bulshada waxaa loo dalacsiiyay in uu noqdo Kormeeraha Guud, iyada oo uu Guerrero codsadey booskiisii.  Ku-xigeenka kormeeraha guud ahaan, Guerrero wuxuu hal meel iskugu keenay istiraatiijiyadihii guuleysatey ee uu ka helay Degmada Mission isaga oo ka dhigay qorshe istiraatijiyadeed ee degmada oo dhan ka kooban oo ay ku jiraan saddex hadaf oo guud oo loogu talagalay helitaanka iyo sinnaanta, guul gaaridda ardayga iyo isla xisaabtanka.

- Ka dhigida cadaaladda bulshada mid run ah oo jirta iyada oo la xaqiijinayo in arday kastaa heli karo wax barid iyo waxbarasho tayo sare leh.
- Abuurista jawi waxbarasho oo ay yeelanayaan dhammaan dugsiga SFUSD oo dhiirigeliya dadka waxbaranaya ee aadka uga qayb qaadanaya ee faraxsan isla markaana taageera in arday kastaa uu gaaro ama gaarto awoodiisa/deeda buuxda.
- Dhowrista ballanqaadyada degmada ee ku aadan ardayda iyo qoysaska iyo in la qoro qof kasta oo ka tirsan bulshada si uu ugu soo biiro in sidaas la yeelo.

Hadafyadani ma ahan fikraddo kaliya warqada ku qoran:  Waxaa taageeraya qorshayaal waxqabasho, miisaaniyad lacageed iyo cabbiraadyo iyo isla xisaabtan.  Muujinta hoggaaminta shaqaale, run ka sheegida aaminsanaanta waxyaalaha muhiimka ah isla markaana mar kasta ardaydu xudun u tahay, taageeraya shaqada adag ee macallimiinta, shaqaalaha, iyo hoggaamiyayaasha, isla markaana xaqiijinaya in dhammaan dugsiyadeenu ay yihiin kuwo wax daryeela, meelo wax taageera halkaasi oo arday kastaa barwaaqo ku gaari karaan, tani waa waxa dhiirigeliya Guadalupe Guerrero.

Tani waa nooca hoggaan ee Guadalupe uu rajeynayo in gacan kaga geysto Dugsiyada Dadweynaha Portland.  Sidii hore u dhacday marar badan ka hor xirfadiisa shaqo, Inkasta oo uu la kulmayo caqabado badan oo hadda jira, wuxuu qabaa dareen wanaagsan oo rajo leh oo ku saaban la shaqaynta macallimiin xirfad leh iyo bulsho weynta PPS si kor loogu qaado iyada si ay u noqoto kuwa hoggaanka u haya nidaamka dugsiga ee dalka.